

# *Magaalada Boston*

## Gudiga Dugsiga

Sebteembar 16, 1998

### HABRAACA MAGAC U BIXINTA DUGSIGA

SIDA LA AMRAY, in Guddiga Dugsigu uu ansixiyo habraaca iyo shuruudaha soo socda si magac loogu bixiyo xarumaha dugsiga:

#### **1. Talooyinka waxaa laga aqbali karaa mid kamid ah saddexda qeybood**

- Xubnaha Guddiga Dugsiga
- Gudiga Rugta Dugsiga, Gudiyada Waalidka Waalidiinta
- Xubnaha Bulshada ama Kooxaha Bulshada

Marka codsiyada la helo, dhammaan dhinacyada waa in la ogeysiiyaa oo loo gudbiyaa nuqulka habraaca iyo shuruudaha.

#### **2. Maqalka**

Talaabada labaad ee habraac waxay u baahan tahay in dhagaysi dadweyne ay ku qabtaan maamulaha iyo golaha dugsiga ee dugsiga. Ujeedada dhageysigu waa in ay ahaato in la soo bandhigo codsiga iyo in la siiyo u ololaynaya fikradan fursad ay ku dhiibtaan sabab macquul ah codsigooda iyo inay ka jawaabaan su'aalaha. Waxa kale oo ay siin doontaa maamulaha iyo golaha dugsiga fursad ay ku maqlaan faalooyinka bulshada dugsiga. Dhageysiga dadweynuhu wuxuu kaloo fursad siin doonaa dhammaan dhinacyada daneynaya iyo kuwa ay khuseyso in la dhageysto. Golaha dugsiga waa inuu soo gudbiyaa talooyinka magac bixinta dugsiga ama goobaha gaarka ah ee dugsiga iyagoo ra'yigooda u gudbinaya Guddiga Dugsiga.

Guddiga dugsiga waxa uu qabanqaabin doonaa magac u bixinta dugsiga si looga doodo oo uu tallaabo uga qaado mid kamid ah kulamadooda caadiga ah.

#### **3. Shuruudaha**

Shuruudaha soo socda waa in lagu tixgaliyaa talo soo jeedinta iyo qaadashada magacyada rasmiga ah ee xarumaha dugsiga:

- Talaabada ku saabsan talo soo jeedinta magac u bixinta xarunta dugsiga waa inay timaadaa kaliya kadib marka lagu qabto dhageysiga dadweynaha ee dugsiga maamulaha iyo golaha dugsiga.
- Magacyada xarumaha waxaa laga yaabaa in lagu maamuuso qofka wax la taaban karo ku soo kordhiyey ama ka soo shaqeeyay dugsiga asagoo bixinya adeeg heer sare ah, nidaamka dugsiga, qaranka, ama bulshada.



### **HABRAACA MAGAC U BIXINTA DUGSIGA (Sii socda)**

3. Magacyada xarumaha ayaa laga yaabaa inay aqoonsadaan qaybta juqraafiga ee magaalada uu dugsigu ku yaallo (sida xaaladdu tahay qaar badan oo ka mid ah dugsiyada sare ee degmada).
4. Magacyada xarumaha waxaa laga soo xigan karaa ujeeda tacliimeed ee dugsiga.
5. Magacyada xarumaha waxa laga yaabaa inay ku dhafaan magaca qofka wax la taaban ku soo kordhiyey dugsiga, nidaamka dugsiga ama bulshada iyo kan ujeedada tacliin ahaaneed.

Magacyada qolalka gaarka ah, goobaha ama qeybaha dhismayaasha dugsigu waxay maamuusi karaan qofka wax ku darsaday ama bixiyay adeeg heersare ah dugsiga ama bulshada.

Amarkan ayaa lagu ansixiyay si aqlabiyad ah.

Attest:  
Christopher M. Horan  
Xoghayaha fulinta